JAMHUURIYADDA SOMALILAND

REPUBLIC OF SOMALILAND

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
SOLICITOR GENERAL OFFICE

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL GAZETTE
# ألنّشرة الرّسمية لجمهورية صوماليلاند

| | | |
|---|---|---|
| *Sannadkii 11aad* | *Cadad Gaar ah* | *Tariikhda Daabacada 26/03/2022* |

# XEERKA KOMISHANKA XUQUUQDA AADAMAHA SOMALILAND
# XEER LR.39/2010

Email: garyaqaankaguud@gmail.com
Web.www.garyaqaankaguud.com

*Sannadka 2022*

*Lama iibin karo*
*Not for sale*

CC.047

**REPUBLIC OF SOMALILAND**

## THE PRESIDENT

REF. JSL/M/DM/249-271/122010 DATE 25/12/10

# Degreeto Madaxweyne No: 0100/1202010

## Dhaqan-galka Xeer Lr. 39/2010
## Xeerka Komiishanka Xuquuqul Aadamaha

### Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**Markuu Arkay:** Qodobka 90aad ee Dastuurka JSL.

**Markuu Helay:** Go'aanka Golaha Wakiilada JSL ee ku suntan GW/KF-13/507/2010 ee 30/10/2010 ee Xeerka Komiishanka Xuquuq Aadamaha Xeer Lr. 39/2010.

**Markuu Arkay:** Qodobka 75-aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

### Wuxuu Soo Saaray

Dhaqan-galka Xeerka Komiishanka Xuquuqul Aadamaha ee Xeer Lr. 39/2010.

REPUBLIC OF SOMALILAND President

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Ref: GW/KF-13/507/2010 Date: 30/10/201

Ujeedo: - Go'aanka Ansixinta Xeerka Komishanka Xuquuqda Aadamaha Somaliland (No.39/2010)

## GOLAHA WAKIILADA JSL

| | |
|---|---|
| MARKUU TIXGELIYEY: | Qodobka **8aad** ee Dastuurka Qaranka |
| MARKUU ARKAY: | Qodobka **10aad** farqadiisa **2aad** ee Dastuurka JSL |
| MARKUU ARKAY: | Qodobka **24aad** ee Dastuurka JSL. |
| MARKUU ARKAY: | Qodobka **25aad ,27aad,28aad,30aad.,31aad,32aa 36aad** ee Dastuurka Dalka |
| MARKUU TIXGALIYAY: | Baahida loo qabo hay'ad Dawladeed oo madax banaan ,kana gaysan doonta taageero dadaalka ay dad-waynaha reer Somaliland ku hiigsanayaan hir-galinta mab'aadiida caalamiga ah ee xuquuqda aadamiga iyo xoriyadaha asaasiga ah |
| MARKUU ARKAY: | Qodobka **113(3)** iyo **122** Dastuurka **JSL** |
| MARKUU Aqoonsaday : | In danta iyo maslaxada shacbiga Somaliland, tahay in la abuuro komishanka Qaranka ee Xuquuqda Aadamaha |
| Markuu U Codeeyey: | Xeerka Komishanka xuquuq Aadamaha JSL , **kal-fadhigii 13aad** ee **fadhigiisii 17aad** ee **Golaha 30/10/2010** oo ay goob joog ahaayeen(44) Mudane oo ka mid ah Mudanayaasha Golaha Wakiilada. |

## WUXUU

Cod aqlabiyad ah **(22 cod)** oo gacan taag ah ku ansixiyay **Xeerka Komishanka Xuquuqda Aadamaha** ee (Xeer **No. 39/2009**), halka ay ka diideen **(7)** Mudane, kana aamuseen **(15)** Mudane.**Gudoomiyuhuna muu codayn** sida caadada ah.

ALLAA MAHAD LEH

*C/risaaq Siciid Ayaanle*
*Xoghayaha. Guud ee Golaha Wakiilada*

*C/casiis Maxamed Samaale*
*K/S Gudoomiyaha Golaha Golaha*
*Ahna GUdoomiye ku xigeenka 1aad*

## GOLAHA WAKIILADU

| | |
|---|---|
| Markuu Tixgaliyey: | Qoddobka 8aad ee Dastuurka Dalka JSL. |
| Markuu Arkey: | Qoddobka 10aad farqadiisa 2aad ee Dastuurka JSL. |
| Markuu Arkey: | Qoddobka 24aad ee Dastuurka Dalka JSL. |
| Markuu Arkey: | Qoddobada 25aad, 27aad, 28aad, 30aad, 31aad, 32aad, 36aad, ee Dastuurka Dalka J.S.L. |
| Markuu Tixgeliyey: | Baahida loo qabo Hay'ad Dawladeed oo madax- banaan, kanagaysan doonta taageero dadaalka ay dad-weynaha reer Somaliland ku hiigsanayaan hir-gelinta mab'aadiida Caalamiga ah ee Xuquuqda aadamiga iyo xoriyaddaha asaasiga ah. |
| Markuu arkay: | Qoddobka 113(3) iyo 122 Dastuurka JSL. |
| Markuu Aqoonsadey: | In Danta iyo maslaxada Shacbiga Somaliland, ay tahay in la abuuro Komishanka Qaranka ee Xuquuqda Aadamaha |

## WUXUU SOO SAARAY XEERKAN



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## CUTUBKA 1AAD
### Qoddobka 1aad

### Eray bixinta

| | |
|---|---|
| Gudoomiyaha: | Waxaa loola jeedaa Guddoomiyaha Komishanka Qaranka ee Xuquuqda Aadamaha. |
| Komishan: | Waxaa loola jeedaa Komishanka Xuquuqda Aadamaha ee Xeerkan lagu aasaasay. |
| Guddiga Xulista: | Waxaa loola jeedaa guddiga loo igmaday xulista xubnaha Komishanka Qaranka ee Xuquuqda Aadamaha. |
| Xubnaha: | Waxaa loola jeedaa xubnaha uu ka kooban yahay Komishanka Qaranka ee Xuquuqda Aadamaha. |
| Cabte: | Waxaa loola jeedaa qofkasta oo xuquuqdiisii iyo xoriyaadkii aasaasiga ahaa lagaga xad gudbay. |
| Warbixin Sanadeedka: | Waxa loola jeedaa warbixin sanadeedka Komishanku sanadkiiba uu u gudbiyo Madaxweynaha iyo Golayaasha Baarlamaanka. |
| Warbixin gaar ah: | Waxaa loola jeeda warbixinta dhacdooyinka gaarka ah ee ay Komishanku u gudbiyaan Madaxweynaha iyo Golayaasha Baarlamaanka |
| Xuquuqda Aasaasiga ah: | Waxaa loola jeedaa Xuquuqda Aasaasiga ah ee Dastuurka Qaranka u gaar yeelay muwaadiniinta. |
| Baarlamaanka: | Waxaa loola jeedaa labada Gole ee Sharci Dejinta Qaranka Somaliland (Guurtida iyo Wakiilada) |

## MABAA'DIIDA GUUD
### Qoddobka 2aad
### Komishanka Qaranka

Komishanka Xuquuqda Aadamiga Somaliland wuxuu ahaanayaa Hay'ad Madaxbanaan oo Qaran, xorna u ah gudashada hawlaheeda si waafaqsan
Xeerkan iyo Qaanuunka Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadamiga, caddaalada iyo mabaadii'da maamulka wanaagsan, waxa kale oo Guddidu u madaxbanaantahay awoodahooda shaqo, baadhiseed, iyada oo wax culays ah lagu saarin dhaq-dhaqaaqoooda shaqo, Sida ku xusan Dastuurka Qoddobka 10aad farqadiisa 2aad



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

### Qoddobka 3aad
### Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa loogu yeedhayaa "Xeerka Komishanka Xuquuqda Aadamaha Somaliland".

### Qoddobka 4aad
### Fasiraad

Xeerkan waxaa loo fasirayaa si waafaqsan Shareecada Islaamka, Xeerarka kale ee Dalka, Dhaqanka suuban iyo Xeerarka Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadamaha.

### Qoddobka 5aad
### Xadka Adeegsiga Xeerka

Xeerkan waxaa lagu dhaqayaa dhamaan Xuduudaha Dalka Jamhuuriyadda Somaliland ka kooban tahay.

### Qoddobka 6aad
### Ujeedada Xeerka

Xeerkan waxaa lagu dhisay Komishanka Qaran ee Xuquuqda Aadamaha, islamarkaana waxaa lagu maamulayaa dhamaan hawlaha la xidhiidha gefka laga galo Xuquuqda Aadamaha iyo Xoriyaadka Aasaasiga ah ee Muwaadinka, iyadoo aan lagu xad gudbayn Xeerarka kale ee Dalka.

### Qoddobka 7aad
### Xarunta Komishanka

Komishanka Qaranka waxay xaruntiisu noqonaysaa caasimada J.S.L, sidoo kale Komishanku waxaa uu go'aansan karaa in uu gobolada kale ka furto xafiisyo, iyadoo ku xidhnaan doonta awoodooda dhaqaale iyo baaxada hawlahooda.

### QODDOBKA 8AAD
### SHURUUDAHA XUBNAHA KOMISHANKA

Shuruudaha lagu xulanayo xubinta waa kuwan hoos ku qoran: -

1. Inuu muslin yahay kuna dhaqmo Diinta Islaamka.
2. Inuu muwaadin yahay, da'diisuna ka yarayn 30 sanno, kana waynaan 65 sanno.
3. Inuu caqli ahaan u gudan karo xilkiisa.
4. Inuu leeyahay aqoon heer Jaamacadeed, mid maamul ama mid sharciba.
5. In aanu hore ugu dhicin Xukun ciqaabeed oo Kama dambays ah oo Maxkamad horteed kaga cadaaday shantii sanno (5years) ee ugu dambeeysay.
6. Inuu yahay xilkas, Akhlaaqdiisa iyo Dhaqankiisuna toosanyahay, yahayna shakhsi ku sifoobay Dhex-dhexaadnimo, Karti, Hufnaan iyo Daacadnimo.
7. Waa inuu leeyahay waayo aragnimo sharciyeed ama Maamul.

## CUTUBKA 2AAD
### Qoddobka 9aad
### Dhismaha Xafiiska Komishanka Xuquuqda Aadamaha

1. Komishanku waxaa uu ka kooban yahay (7) xubnood oo lagu soo xulay shuruudaha ku cad Qoddobka 8aad ee Xeerkan.
2. Waxay ku imanayaan xubnaha Komishanka Qaran qaabka xulista ah, Madaxweynuhuna Digreeto ku soo saaro magacaabistooda.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE

3. Gudoomiyaha Komishanka Qaran ee Xuquuqda Aadamaha iyo ku xigeenka waxaa iska dhex dooranaya xubnaha komishanka ka-dib marka la ansixiyo.
4. Xubnaha Komishanka 1/3 waa inay noqdaan garyaqaano heer Jaamacadeed ah.

## QODDOBKA 10AAD
## GUDDIGA XULISTA XUBNAHA KOMISHANKA & HABKA XULISTA.

1. Marka xeerkani ansaxo Madaxweynuhuna saxeexo, wuxu Madaxweynuhu qoraal ku war gelinayaa, kagana codsanaya shirguddoonka Golaha Guurtidda iyo Guddoomiyaha Maxkamadda sare, in ay ku soo magacaabaan xubnahooda uga qayb galaya guddiga xullista xubanaha Komishanka Qaranka, muddo aan ka badnayn 10 maalmood, Sidoo kale, Madaxweynuhuna waxa u xubnaha ka qayb-galaya Guddiga Xullista Xubnaha Komishanka kusoo magacaabaya isla muddadaas hore dhexdeeda, Hase ahaatee saddex bilood ka hor (3Months before) dhammaadka muddada xilka komishanka hore, ayuu Madaxweynuhu ku war-gelinaya Shir-guddoonka Golaha Guurtidda iyo Guddoomiyaha Maxkamadda in ay soo magacaabaan xubnihii uga qayb-geli laha Guddigga Xullista Xubnaha Komishanka Qaranka.
2. Guddigga soo xulista xubnaha Komishanku waxay ka kooban yihiin (7) xubnood oo ka kala socda.
   B. Saddex xubnood oo Madaxweynuhu ka soo magacaabo Dadweynaha.
   t. Laba Xubnood oo ka tirsan Golaha Guurtidda, Goluhuna magacaabo.
   j. Laba garsoore, oo ka tirsan Garsoorayaasha Maxkamadda sare, soona magacaabo Guddoomiyaha Maxkamadda sare.
3. Muddo (7) maalmood gudahood ah oo ka bilaamaysa marka Madaxweynuhu helo magacaabista xubnaha Guurtida iyo Maxkamada Sare, magacaabistiisana dhammaystiro, wuxuu isugu yeedhayaa xubnaha Guddigga xulista ee Xubanaha Komishanka Qaran si ay u gutaan xilkooda iyo waajibadkooda.
4. Guddiga Xulista Xubnaha Komishanka qaranku waxay fadhigooda u horeeya oo ku qabsoomaya 7 Maalmood gudahood iska dhexdooranayaan Guddoomiye iyo Guddoomiye-ku-xigeen, ka dibna waxay dajisanayaan Nidaamka ay u raacayaan xulista oo waafaqsan Xeerkan.
5. Guddiga Xulista Xubnaha Komishanka Qaranku waxa kale oo ay isla toddobaad guddihii ku faafinayaan war-baahinta dalka ogeysiis ku saabsan qabashadda araajida Muwaadiniinta reer Somaliland ee codsanaya in ay ka qayb-galaan tartanka xubnaha loo xuliyo komishanka Qaranka ee Xuquuqda Aadamaha.
6. Araajida waxaa lagu soo hagaajinayaa Xafiiska Xoghayaha Guud ee **Golaha Guurtida**, muddada qabashada araajidu waxay noqonaysaa (15) maalmood oo ka bilaabmaysa dhammaadka muddada ku xusan farqada (5aad) ee Qodobkan.
7. Marka ay dhammaato muddada qabashada araajidu ee ku xusan farqada (6aad) ee qoddobkan, Guddiggu muddo (21) maalmood gudahood ah waxay ku dhammaystirayaan kala saarista araajida tartamayaasha, kuna soo xulayaan (14) xubnood oo u qalma in ay ka mid noqdaan Komishanka Qaran ee Xuquuqda Aadamaha.
8. uddiggu marka ay hawshaas dhamaystiraan waxay soo jeedin ahaan ugu gudbinayaan Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland muddo 7 maalmood gudahood ah oo ka bilaabmaysa dhammaadka muddada ku xusan faqrada 7aad ee Qoddobkan liiska (14) ka xubnood ee ay komishanka u soo xuleen.
9. Madaxweynaha marka ay soo gaadho soo jeedintaas (14) ka xubnood ah.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR ... OFFICE

B. Wuxuu ka soo magacaabayaa (7) da xubnood ee noqonaya Komishanka Qaranka ee Xuquuqda Aadamaha.

t. Madaxweynaha waxa waajib ku ah in uu todobada

xubnood ku soo saaro Digreeto Madaxweyne, muddo (10) maalmood gudahood ah, isaga oo u gudbinaya Golaha Wakiilada si ay mid mid ugu ansixiyaan cod-haldheeri ee fadhiga madasha

10. (7) da xubnood ee hadhay waxay noqonayaan kayd, iyada oo loo kala xulan doono sida ay liiska ugu kala horeeyaan. Sida ay u kala horeeyaana waxay ka muuqan doontaa Digreetada Madaxweynaha

11. Guddigga xullista xubnaha Komishanka Qaran ee Xuquuqda Aadamaha iyo Madaxweynaha **J.S.L** waxaa waajib ku ah, marka xubnaha la xulanayo, in ay tix-geliyaan mab'da dheelitirka Aadamaha (Lamaane) (Gender balance) iyo beelaha la hayb-sooco.

## Qoddobka 11aad
## Dhaarta Xubnaha

1. Madaxweynaha J.S.L, marka Golaha Wakiiladu ansixiyo xubnaha Komishanka Qaran ee Xuquuqda Aadamaha muddo 15 maalmood Gudahood ayuu isugu yeedhayaa fadhigooda ugu horeeya, waxaana si xubin-xubin ah u dhaarinaaya xubnaha Komishanka Qaran ee Xuquuqda Aadamaha Gudoomiyaha Maxkamada Sare.
2. Dhaarta xubnaha Komishanka Qaran ee Xuquuqda Aadamaha waxay noqonaysaa dhaarta ku xusan Qoddobka 129aad ee Dastuurka **J.S.L.**
3. Guddoomiyaha iyo xubnaha Komishanka Qaran ee Xuquuqda Aadamaha doorashadooda ka dib waxaa ay si buuxda u la wareegayaan hawsha xafiiskooda.

## Qoddobka 12aad
## Waajibaadka Shaqo ee Gudoomiyaha Komishanka

Waajibaadka Gudoomiyaha Komishanku waxay noqonaysaa: -

1. Madaxa Komishanka Qaranka ee dalka.
2. Waxaa uu mas'uul ka yahay jihaynta arrimaha iyo maamulka Komishanka Qaranka.
3. Daba galka iyo la socodka shaqada xubnaha iyo Agaasimaha maamulka xafiiska.

## Qoddobka 13aad
## Waajibaadka Shaqo ee Gudoomiye Ku Xigeenka

1. Qabashada hawlaha shaqo ee xafiiska marka uu Gudoomiyuhu maqan yahay.
2. Iyo hawlaha kale ee Gudoomiyuhu u igmado.

## Qoddobka 14aad
## Cidda aan Xubin ka Noqon Karin Komishankan Qaran

Qofkasta oo xil ka haya Hay'addahan hoos ku qoran Kama mid noqon karo xubnaha Komishankan Qaran: -

1. Xubin Baarlmaanka ka tirsan.
2. Xubin Golayaasha Deegaanka ka mid ah.
3. Xubin Gudiyada Fulinta ee Xisbiyada ka tirsan.
4. Xubin Shaqaale Dawladeed ah.
5. Xubin Garsoorka ka mid ah.

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

6. Xubin ciidanka ka tirsan.
7. Xubin Golaha Fulinta ka tirsan.

## Qoddobka 15aad
## Darajada Xubnaha

1. Darajo ahaan Guddoomiyaha Komishanka Qaranka ee Xuquuqda Aadamahu waxay la mid tahay darajada Garsooraha Maxkamada Sare.
2. Darajada Xubnaha kale ee Komishanka waxay la mid tahay darajada Gudoomiyaha Maxkamada Rafcaanka.

## Qoddobka 16aad
## Agaasimaha Maamulka Komishanka Qaran ee Xuquuqda Aadamaha

1. Xafiiska maamulka Komishanka Qaranka ee Xuquuqda Aadamaha wuxuu yeelanayaan Agaasimaha Maamul oo uu magaacaabo Gudoomiyahu, oo ay ku ansixiyaan komishanku, cod hal-dheeri ah.
2. Komishanku wuxuu yeelanayaa la taliye sharci oo tartan furan laga dhex qaato muwaadiniinta aqoontaa sharci leh ee u tartanta xilkaa.

## Qoddobka 17aad
## Xilka Iyo Hawlaha Agaasimaha Maamulka

1. Agaasimaha maamulka waxaa uu hoosyimaadaa Gudoomiyaha Komishanka, waxaana uu ku shaqeeyaa awaamiirtiisa.
2. Agaasimahu waxaa uu mas'uul ka yahay fulinta go'aamada Komishanka isuduwida dhamaan hawl-maalmeedka xafiiska iyo hawlgalinta shaqalaha kale ee xafiiska.
3. Waxa kale oo uu fulinayaa hawlaha kale ee uu u igmado Komishanku.
4. Agaasimaha waxaa uu ka qayb gelayaa shirarka Komishanka, waxaa uu qaadayaa hadal qoraalada wax cod ahna ma laha.

## Qoddobka 18aad
## Xilka ka Qaadista Agaasimaha

1. Agaasimaha waxaa xilka ka qaadaya gudoomiyaha Komishanka, waxaana ogalaanaya Komishanka.
2. agaasimaha waxaa xilka lagaga qaadi karaa marka ay yimaadaan asbaabahan hoose: -
   b. Haddii uu guddan kari waayo xilkiisa, sababo caafimaad, bukaan maskaxeed awgeed.
   t. Ama uu karti daro awgeed uu gudan kari waayo xilkiisa.
3. Ka hor inta aan xilka laga qaadin agaasimaha waa in digniin afka ah la siiyo, marka labaadna digniin qoraal ah.

## Qoddobka 19aad
## Muddada Komishanka

1. Muddada xilka xubnaha Komishanka Qaran waa (5) sannadood laga bilaabo maalinta la dhaariyo, waxaana xubinta dib loo dooran karaa (1) mar oo kale.
2. Xubinta komishanka hore ee dib loo dooranayo, waxaa dib loogu dooran karaa hab raac la mid ah kii lagu doortay kamana badnaankarto laba jeer sida ku cad xeerkan.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qoddobka 20aad
## Xil ka Qaadista Xubnaha Komishanka

1. Guddoomiyaha iyo xubnaha kale ee Komishanku waxay xilkooda ku waayayaan geeri xubinta Ku timaada.
2. Xilka fadhiisasho qoraal ah oo ay xubinta u gudbiso Madaxweynaha, Golahana ogaysiin siiso.
3. Ama uu galo dambi xadhigiisu gaadhayo muddo sadex (3) Sano ah ama ka badan.
4. Guddan kari waayo xilkiisa sababo Caafimaad darro ama bukaan maskaxeed awgeed oo ay cadeeyeen guddi dhakhaatiir ah oo ka diwaangashan Wasaarada Caafimaadka.
5. Uu ka maqnaado afar (4) fadhi oo isku xiga oo aan maqnaashihiisu sababaysnayn fadhiyadda xubnaha Komishanka, waana in ay xubnahakale ee Komishanku caddeeyaan, saxeexaana una gudbiyaan Madaxweynaha si uu u soo buuxiyo.

## Qoddobka 21aad
## Xil ka qaadista Gudoomiyaha

1. Gudoomiyaha xilka gudoomiyenimo waxaa ka qaadi kara, xubnaha komishanka iyadoo aan laga qaadin xilkii xubinimada Komishanka.
2. Gudoomiyaha xilka qaadidiisu waxay ku iman kartaa sababahan:

   b. In uu gudan kari waayo xilkii gudoomiye sabab caafimaad oo ay soo cadeeyaan Guddi Dhakhaatiir ah oo Wasaarada Caafimaadku aqoonsan tahay

   t. In uu lumiyo xubinimadii komishanka sababaha ku sheegan xeerkan

   j. In uu la yimaado talo maroorsi iyo keli talisnimo uu hawshii Komishanka kelidii ku maroorsado oo ugu yaraan sadex xubnood oo komishanka ahi soo jeediyaan in xilka laga qaado.

   x. In uu la yimaado karti daro fadhiid ka dhigta hawshii komishanka oo ugu yaraan sadex xubnood oo xubnaha komishanka ka mid ahi soo jeediyaan.

   kh. In uu khilaaf ku saabsan Maamulka ama Maaliyadda ay cadaato in uu mas'uul ka yahay Guddoomiyuhu, baadhis ka dibna ay sidaas tallo ku soo jeediyaan Guddi Madax-banaan oo Madaxweynuhu Magacaabay

   d. Haddii xubnaha komishanku uu shir isugu yeedhi waayo laba (2) bilood oo xidhiidh ah.

   r. In xubnaha komishanku ogolaadaan in lagu oogo dacwad denbi oo ciqaabtiisa ugu yari ay ka badan tahay sadex sano
3. Xaaladaha ku xusan xarfaha faqrada 2aad ee qodobka waxaa xilka qaadista Gudoomiyaha xubnaha komishinku ku ogolaanayaan 2/3 xubnaha kale ee Guddigga
4. Shirka xilka lagaga qaadaayo Gudoomiyaha Komishanka waxaa isugu yeedhaaya Gudoomiyaha, hadii uu isugu yeedhi waayo waxa isugu yeedhaaya G/ku-xigeenka komishanka.
5. Fadhiga Gudoomiyaha xilka lagaga qaadaayo waa inuu joogaa gudoomiyuhu marka aanay jirin sababta ku cad farqada 2aad xarfaha (b iyo t) ee Qodobkan. Codna kuma leh, wuxuuse xaq u leeyahay inuu iska difaaco eedaha loo soojeediyay markay jiraan.
6. Fadhiga gudoomiyaha xilka lagaga qaadaayo ayaa gudoomiye cusub lagu dooranayaa.

## Qoddobka 22aad
## Sababaha Kale ee Xilka Qaadista Xubnaha

1. Gudoomiyaha Komishanka iyo xubnaha kale ee komishanka waxaa kale oo xilka lagaga qaadi karaa:-

   b. Inay lumiyaan dhex-dhexaadnimada.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

t. Inay si ula kac ah uga gaabsadaan gabood fal Xuquuqda Aadamaha ah oo soo gaadhay ama looga soo dacwooday.

j. Marka gabood fal Xuquuqda Aadamaha ah oo ay ku helaan baadhistooda ay qariyaan ama ka been sheegaan iyagoo cid ugu danaynaya ama ku ilaalinaya.

2. Habka xilka qaadista xubinta komishanka waxaa loo raacayaa sidan: -

(b) Marka (1/3) saddex meeloodow meel xubnaha Golaha ah, oo sidaas motion ku soo jeediyo.

t. Marka Madaxweynaha J.S.L, uu soo jeediyo in xilka laga qaado oo sababaysan.

j. Marka baadhis ka dib Guddiga Golaha Wakiilada u qaabilsan Xuquuqda Aadamaha uu sidaa talo ku soo jeediyo.

x. Soo jeedimaha faqrada (a), (b) iyo (c) waa in ay helaan ogalaanshaha Golaha Wakiilada oo cod buuxa (Absulate Majority).

## Qoddobka 23aad
## Shaqaalaha Komishanka

1. Komishanka Qaran ee Xuquuqda Aadamuhu waxay shaqaalaha xafiiskooda u qoranayaan si madaxbanaan iyagoo u raacaya baahidooda xafiis, si ay ugu suurtogasho habsami u gudashada hawlahooda xeerkani sargooyey waafaqsana xeerka shaqaalaha dawlada.
2. Shaqaalaha Komishanka Qaran waxay xilkooda u gudanayaan si waafaqsan heshiiska ay wadagalaan Komishanka Qaran iyo xeerarka shaqo ee dalka.
3. Komishanka Qaranka marka ay dejiyaan baahidooda xafiis, shaqaalaha mushaharkooda iyo gunadoodaba, waxay kala tashanayaan Wasaaradda Maaliyada.
4. Isla markaana waxay la socodsiinayaan tirada shaqaalaha ay qorteen iyo darajadoodaba Hay'adda Shaqaalaha Dawlada.

## Qoddobka 24aad
## Buuxinta Jagada Banaan

1. Madaxweynaha ayaa qoraal ku soo saaraya in xubintaas jagadeedu banaantahay, iyada oo sababaysan.
2. Marka jago ka banaanaato Komishanka iyadoo loo raacayo sida ku xusan Qoddobka **10aad** faqrada **10aad** waxaa la qaadanayaa **todobada Xubnood** ee kaydka ah oo uu toos Digreeto ugu soo saarayo Madaxweynuhu, Golaha Wakiiladuna ansixiyo.
3. Marka xubnaha kaydka ah dhamaadaan waxaa la xayeysiinayaa jagadaas buuxinteeda iyada oo loo marayo habkii xubnaha lagu soo doortahay.
4. Haddii xubinta jagada banaysay ay tahay Guddoomiyaha, inta laga dooranayo Gudoomiye waxaa xilka si ku meel gaadh ah u sii haynaya Gudoomiye ku xigeenka Komishanka.

## Qoddobka 25aad
## Habka fadhiyada Komishanka

1. Komishanku waxay samaysanayaan Xeer hoosaadkooda iyo hanaankooda shaqo.
2. Komishanku waxay isku maamulayaan Xeer hoosaadkooda oo ay ku caddahay hab-dhaqankoodu.
3. Komishanku waxay shirarkooda ku qabsanayaan meesha ay u arkaan in ay ku haboontahay, waxaana laga maarmaan ah in ay bishii laba jeer kulmaan.
4. Tirada fadhiyada Komishanku ku qabsoomayo waa (5) xubnood in ay joogaan fadhigaas.
5. Go'aamada iyo awaamiirta Komishanka waxaa ku dhawaaqaya Guddoomiyaha Komishanka, marka uu maqan yahayna ku xigeenka ama xubinta loo igmaday oo Komishanka ah.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

6. Komishanka waxay isu qaybin karaan Guddi hoosaadyo, waxaanay adeegsan karaan aqoonyahano ka caawiya hawshooda farsamo ahaan.

## CUTUBKA 3AAD
## Qoddobka 26aad
## Waajibaadka Komishanka Qaran ee Xuquuqda Aadamaha

Komishanka Qaran ee Xuquuqda Aadamaha waxaa waajibkoodu yahay: -

1. In ay baadhis madax-banaan ku sameeyaan arrin ay u arkaan Komishan ahaan, in ay keentay tacadi Waxyeelo Bulsho oo in la baadha ay muhiim tahay.
2. In ay kor-meeraan xabsiyada, saldhigyada iyo goobaha kale ee xabsi ahaanta loo isticmaalo si ay u soo eegaan ama wax uga ogadaan xaalada ay ku sugan yihiin dadkaas xidh-xidhan si ay talo haboon uga soo jeediyaan;
3. Wacyi-gelinta iyo barista bulshada Xuquuqda Aadamaha iyo sababta loogu baahan yahay in la qadariyo xuquuqahaas, iyada oo la adeegsanayo barnaamijyo cilmi baadhiseed, warbaahinta ama qaab kullameed komishanku u arko in ay ku haboontahay;
4. In ay kormeeraan hay'addaha dawlada ee la xidhiidha Xuquuqda Aadamaha iyo ka talo-siinta sidii hore loogu Marin lahaa Maamulwanaaga iyo dhaqan-gelinta, qadarinta xuquuqda muwaadinka;
5. U soo jeedinta Baarlamaanka wax ka beddelka Xeerarka ama habab wax-ku-ool ah oo lagu hor-marinaayo Xuquuqda Aadamaha;
6. In ay Golaha Wasiirada iyo hay'addaha kale ee xukuumadda u soo jeediyaan tallooyin ku wajahan ilaalinta iyo dhawrida Xuquuqda Aadamaha iyo xoriyaadka aasasiga ah ee muwaadiniinta;
7. Waxay xoojinayaan xidhiidhka wada-shaqayneed ee iyagga iyo ururadda waddaniga ah ee ku hawlan horumarinta Xuquuqda Aadamaha, isla markaana wada-shaqayn iyo xidhiidh la yeellanayaan ururadda caalamiga ah;
8. Marka uu fullinayo waajibaadkiisa, Komishanku waa in uu had iyo goor raadiyaa in uu gaadho xal niyadsamid ku salaysan oo uu ku dhex-dhexaadinayo dhinacyada. Marka uu sidaasi sammaynayo, komishanku kuma khasbana aragtida dhinacyada;
9. Komishanku wuxu Goleyaasha, Wasiiradda iyo Baarlamaanka (Guurtidda iyo Wakiiladda) Tallo-bixin ka siinaya sidii loo qaadi lahaa tallaabooyin wax-ku-ool ah oo ku wajahan Ilaalinta iyo dhawridda xuquuqda Aadamaha & Xoriyaadka Aasaasiga ah, kuwaasi oo ay ku jiraan Ogolaanshaha iyo hir-gelinta Qawaaniinta Baaqyadda iyo heshiisyadda laga gallo horumarinta Xuquuqda Aadamaha (International Instruments);
10. Kormeerka iyo qiimeynta Xaq-dhawrka ay hay'addaha dawladdu u hayaan illaalinta xuquuqda Aadamaha iyo ka gacan siinta sidii hore loogu marin laha hawlaha Muwaadiniinta;
11. Kormeerka iyo qiimeynta Heerarka Horumarinta Adeegyadda iyo kaabayaasha kala duwan ee Dowladdu u hayso Bulshadda iyo in adeegyaddaasi loo gaadhsiiyay degaanadda si miisaaman oo leh dheeri-tirkeeda, gaar ahaan horumar leh Illaalintiisa Deegaan (Sustainable Development);
12. Komishanku waxa uu u gudbinaya Golaha Baarlamaanka (Guurtidda iyo Wakiiladda) & Madaxweynaha, war-bixin sanadeed iyo war-bixin khaas ahba, marka ay lagama-maar-maan ugula muuqato.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

## CUTUBKA 4 AAD

## Qoddobka 27aad

## Awoodaha Komishanka Qaran ee Xuquuqda Aadamaha

1. Komishanka Qaranka waxaa Xeerkani u awood yeelay in ay leeyihiin dhamaan awoodaha muhiimka u ah Gudashada xilkooda ama waajibaadkooda oo ay ka madax-banaanyihiin tilmaamaha iyo amarada dibada kaga yimaada.
2. Komishanku marka ay waajibaadkooda sharci gudanayaan waxaa ay leeyihiin awoodaha dhex-dhexaadin, heshiisiin iyo baadhitaan xaqiiqo raadis iyo go'aan ka gaadhidooda.
3. Komishanku haddii ay ku qancaan in uu jiro gabood fal laga galay Xuquuqda Aadamaha ama xoriyaadka aasaasiga ah waxay soo saarayaan: -

   b. Qoraalo maamul oo ku saabsan gudashada waajibkooda ee ku xusan Xeerkan.

   t. Waxay waydiimo ku samayn karaan cid kasta oo xidhiidh la leh arrin baadhitaankeeda gacanta Komishanku ku hayo.

   j. Raadinta cid kasta oo war ka haysa in ay sheegto arrin Komishanka baadhiteeda Gacanta ku hayo.

   x. Waxay Maxkamada ka codsan karaan in la sii daayo cidkasta oo si aan sharciga waafaqsanayn loo xidhay.
4. Komishanku Hay'ad kasta oo Dowladeed iyo mid madax-banaan wuxu kala xidhiidhi kara waxyaabaha ka khuseeya Hawlahooda iyaga oo isla markaana tallooyin ka soo jeedinaya habkii loo ilaalin laha Xuquuqda Beni-aadamka iyo sidii muwaadiniinta loogu dhiqi lahaa, ma'abaadiida Maamul wanaaga. Haddii tallooyinkii loo hir-gelin waayo sidii loo soo jeediyay waa in qoraal lagaga jawaaba sababaha loogu dhaqmi waayay, kana hay'adda ay khusaysaa.
5. Marka ay wax baadhayaan, Komishanku waa in ay awood aan xaddidnayn u yeeshaan meel kasta iyo feyl kasta oo ay u baahdaan oo ay kujiraan xataa kuwa sirta ahi. Hay'ad kasta iyo sarkaal kastaaba waa in uu komishanka wada-shaqayn buuxda siiyaa, wixii ay uga bahdaan marka ay baadhitaanka ku jiraan, isla markaana siiyaan, marka ay codsadaan wixii warar iyo macluumaadba ah ee ay hayaan iyada oo aan wax tixgelin ah la siinayn heerka sirnimadoodu gaadhsiisaan tahay, war iyo macluumaad kasta oo la siiyaba komishanku waa in uu u dhowraa sida ay yihiin ama heerka ay gaadhsiisan yihiin. Dadka xorriyadooda laga qaado waxay xaq u leeyihiin in ay komishanka ugu dacwoodaan waraaqo xidhan, xidhiidhka iyo is-gaadhsiinta iyaga iyo komishanka dhex-maraya waain aan la baadhin ama aan sinaba loo fara-gelin.
6. Hadii ay natiijada baadhitaanku noqoto mid tacadi iyo xad-gudub ku ah xuquuqda Dacwoodaha ama ay maamul ahaan waxyeelo u geysato,

Komishanku war-bixin tallooyin ku ladhan yihiin ayay u gudbin doonaan hay'adda ay arrintaasi khusayso si loo saxo waxyaabaha laga soo dacwooday.

## Qoddobka 28aad

## Reebanaanta Garmaqalka

1. Ma banaanna in Komishanku faro-geliyo dacwadaha ay garmaqaladoodu ka socdaan Maxakamadaha.
2. Marka laga reebo dacwad geedi socodkeedii dib u dhac bilaa sabab ahi uu ku yimid ama xad gudub cadaana uu maamulku kula kacay, waxaa Komishanku warbixin sababaysan u gudbinaya Gudoomiyaha Maxkamada Sare oo ah Gudoomiyaha Guddida Cadaalada, si uu Gudoomiyuhu waajibkiisa arrintaa ku aadan uu uga guto.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA · FAAFINTA RASMIGA AH · OFFICIAL GAZETTE · SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qoddobka 29aad
## Dacwadaha Mudo-Dhaafka Ah

Ma banaana in dacwaddaha la hor-keeno komishanka in ka badan hal sano ka dib marka xad-gudubku ama maamul xumadu ay dhacday marka laga reebo dambiyada ku cad qoddobka **24aad** faqrada **4aad** ee Dastuurka JSL.

## Qoddobka 30aad
## Fursad u helida Komishanka ee xafiisyada Madaxda Qaranka

1. Gudoomiyaha Komishanka iyo xubnaha komishankuaba waa in ay fursad u helaan markasta oo ay u baahdaana la kulmi karaa Madaxweynaha, Madaxwayne ku xigeenka, Shirgudoonka labada Gole iyo Gudoomiyaha Maxakamada Sare, marka ay hawl la xidhiidha shaqadooda ula kulmayaan.
2. Gudoomiyaha Komishanka, xubnaha kale ee Komishanka iyo guddiyada Komishanku waa in ay u furan yihiin oo markasta oo ay u baahdaan la kulmi karaan masuuliyiinka kale ee Dawlada sida wasiirada, wasiir ku xigeenada, xeer-ilaaliyaha guud, gudoomiyayaasha hay'adaha Dawlada ee Madaxa banaan iyo madaxda kale ee dawlada.
3. Dhammaan Madaxda iyo masuuliyiinta ku xusan faqradaha hore ee qoddobkan waxaa ku waajiba in ay tixgeliyaan talooyinka iyo soo jeedimaha Komishanka Qaranka ee Xuquuqda Aadamaha.

## Qoddobka 31aad
## Xaqa Cabashada

1. Qof kasta oo ka cabanaya in xuquuqdiisii/deedii aadanimo iyo xoriyaadihiisa/heedii aasaasiga ahaa ay ku xadgudbeen Hay'ad Dawladeed, maamulada Dawlad Hoose ama Hay'ad loo igmay maamul bulsho, waxaa uu u caban karaa Komishanka iyo hay'adaha gaarka ah.
2. Komishanku wuxuu si sharci ah u bilaabi karaa cabasho isagoo wakiil ka ah cabtaha /tada ama wakiilkiisa, marka uu Komishanku cabasho noocaas ah galayo waa in uu helaa ogolaanshaha cabtaha /tada ay ku wakiilanayso in Komishanku arrintaasi galo xaaladaha ay Komishanka u suurto geliweydo helitaanka cabashada/cabtaha duruufo u gaar ah awgeed (sida xabsi uu ku jiro) waxay Komishanku ku hawl-gelayaan baadhiso ay ku sameeyaan warbixinta ay heleen.
3. Cabashada waa in ay ahaataa qoraal, kana koobnaataa Magaca Cawdaha, Saxeexiisa, Cinwaankiisa oo dhammaystiran, cida laga cabanayo iyo duruufaha laga cabanayo oo faah-faahsan.

## Qoddobka 32aad
## Awooda Baadhista Komishanka

1. Komishanku waxaa uu u baadhi karaa cabashada si madaxbanaan.
2. Komishanku go'aankiisa uu ku bilaabayo baadhitaan kasta oo uu samaynayo waa in uu ku wargeliyaa hay'adda ay khusayso, Waana in la siiyaa muddo ay kaga soo jawaabto Hay'addaas tabashooyinka laga tirsanayo,
3. Hay'adda muddadaas ku guul daraysata in ay komishanka ugu soo gudbiso warbixintii looga baahnaa, waxaa komishanku qoraal ku waydiinaynaa hay'addaas sababaha ay u fulin wayday codsigii komishanka.
4. Komishanku waxaa uu Hay'adda ka codsan karaa in su'aalo gaar ah wakhti xaddidan gudihii kaga soo jawaabto eedaha tabashada, wakhtigaas oo aan ka badnaan Karin **10** maalmood.
5. Isla muddaas ku xusan faqrada **4aad** ee qoddobkan haddii ay hay'addu kaga soo jawaabi waydo waxaa Komishanku go'aan ka gaadhaya cabashadaas.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

6. Haddii natiijada badhitaanku muujiso fal gabood fal ku ah xuquuqda cabtaha ama uu maamul ahaan waxyeelo u gaystay; komishanku wuxuu soo saarayaa warbixin talooyin ku ladhan yihiin una gudbinayaa hay'adii ay khusaysay, si ay wax uga qabtaan.
7. Haddii gabood falku noqon waayo mid ay wax ka qaban karaan hay'adii ay khusaysay, ama haddii hay'adaasi wax ka qaban waydo, waxaa komishanku warbixinta iyo talooyinkooda u gudbinayaan maamulka ka sareeya ama wax qabadkiisa leh.
8. Komishanku waxay dabagal ku samaynayaan, gabood-faladaas faqradaha hore lagu sheegay ilaa inta si dhamaystiran wax looga qabanayo.
9. Haddii xaaladaha ku xusan faqradaha (6 iyo 7) ee qodobkan, lagu dhaqmi waayo talooyinkooda ama wax laga qaban waayo gaboodfalkaas, waxay warbixinta sida ay wax u dhaceen iyo talooyinka wax lagaga qabanayo u gudbinayaan M/waynaha, & Golayaasha sharci dejinta, iyadoo ay waajib ku tahay M/waynaha in uu talooyinkaas komishanka ku dhaqmo.
10. Gabood-falada lagu sheegay faqradaha qodobkan komishanku wuxuu ku darayaa warbixintiisa sanadlaha ah ama warxibinaha lagu sheegay xeerkan, iyagoo ku xusaya gabood-falka la gaystay, cida loo gaysatay, hay'ada gaysatay, talooyinka ay ka bixiyeen, sida wax looga qaban waayey ama wax looga qabtay iyo sida ay u dabagaleen iyo tallaabooyinka ay ka qaateen.

## Qoddobka 33aad
## Faro-gelinta Garmaqalada Komishanka

1. Ma banaanna in farogalin lagu sameeyo garmaqalada horyaal Komishanka.
2. Komishanku waa in uu u gutaa hawshiisa si madaxbanaan iyo dhexdhexaadnimo ah oo waafaqsan Xeerkan.
3. Garmaqalada ka socda komishanka hortiisu waa in ay noqdaan qarsoodi, balse war-bixinada, go'aanadda, talo-bixinada iyo soo jeedimaha uu Komishanku sameeyaa waa in dadweynuhu heli karaa.
4. Waa lacag la'aan garmaqalada, go'aamada iyo talobixinada Komishanku.

## Qoddobka 34aad
## Baadhitaan La'aanta Komishanka ee Cabashada

1. Ka baaqashada baadhitaan ee Komishanku ku sameeyo cabasho, sababaha uu ku diiday cabashadaa waxaa uu ku sheegaya go'aan maamul.
2. Go'aanka maamulka ee uu ku diiday cabashadaa waxaa rafcaan looga qaadan karaa Maxkamada Sare.

## Qoddobka 35aad
## Ka Baaqashada Amarka Komishanka

1. Haddii aanu si ka duwan sharcigu u sheegin qof kasta oo ku guuldaraysta in uu hortago Komishanka, iyada oo looga yeedhay in uu hor-yimaado ama diida in uu dhaarto ama ka jawaabo su'aalo loo waydiiyey si sharciga waafaqsan ama diida qoraalo uu hayo oo ku saabsan arrin uu Komishanku gacanta ku hayo, Waxaa loo gudbinayaa Xeer Ilaaliyaha Guud isaga oo Maxkamad horteeda kaga oogaya dacwad si waafaqsan qoddobka 505aad Xeerka Ciqaabta Guud.
2. Xeer Ilaaliyaha Guud waxaa waajib ku ah in uu la hawlgalo Komishanka markasta oo ay hawl uga baahdaan sidaasna ay qoraal kaga codsadaan.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

### Qoddobka 36aad
### Dhawrsanaanta Xubnaha Komishanka

1. Xubinta Komishanka ah lama xidhi karo, lamana geyn karo Maxkamad haddii marka hore aan laga helin ogalaansho, Golaha Wakiilada, waxaa ka reeban marka lagu qabto isaga oo dembi faraha kula jira aan ciqaabtiisu ka yarayn 3 sanadood.
2. Xubnaha Komishanka, shaqaalaha Komishanka iyo cid-kasta oo ka qayb gashay arrin Komishanku galay ama uu gacanta ku hayo laguma eedayn karo, fal hawshaa komishanka la xidhiidhana dembi looguma raaci karo.

### Qoddobka 37aad
### Markhaatiyada Komishanka

1. Komishanku waxaa uu u yeedhan karaa, dhegeysana karaa markhaatiyo.
2. Markhaatiyada komishanka u yeedho, haddii loo baahdo waxaa la joogi kara la taliye sharci.
3. Komishanku waxaa uu awood u leeyahay in uu dhaariyo markhaatiga.
4. Caddayn kasta oo uu bixiyo markhaatigu waa la qorayaa.
5. Markhaatiyada la hawl gala Komishanka waxa ay leeyihiin dhawrsanaanta Komishanka oo kale mawduuca ay maragga ka yihiin.

## CUTUBKA 5AAD
### Qoddobka 38aad
### Warbixinta Komishanka Qaran ee Xuquuqda Aadamaha

1. Komishanku waxay u gudbinayaan warbixin sannad kasta dhamaadkiisa (Dec.) Madaxweynaha iyo Golaha Baarlamaanka. Waxaa kale oo ay u gudbinayaan warbixino gaar ah Madaxweynaha iyo Golayaasha Baarlamaanka (Guurtida iyo Wakiilada) haddii loo baahdo.
2. Warbixin sanadeedka Komishanka Gudbinayaa sida ku xusan Qoddobkan waxay ka koobmaysaa xaalada guud ee Xuquuqda Aadamaha dalka ee xiligaas iyo dhacdooyin gaarka ah ee mudan in warbixin gaar ah laga sameeyo.
3. Warbixinta gaarka ah waa in muddo bil guddaheed ah ay ku gudbiyaan laga bilaabo maalinta dhacdada, waana la kordhin karaa muddada haddii ay baadhistu dhamaan waydo, waase in aanay ka badnaan sadex bilood.
4. Warbixinaha ay Komishanku u soo gudbinayaan Golayaasha Baarlamaanka, lana ogeysiiyay Madaxweynaha iyo Wasiirka Caddaalada waa in sideeda loogu dhaqmaa.

### Qoddobka 39aad
### Xogwaraysi

1. Golayaasha xeer-dejintu way u yeedhi karaan komishanka ama Gudoomiyaha Komishanka si ay wax uga waydiiyaan arrimo shaqadooda la xidhiidha.
2. Guddiga Golaha wakiilada u qaabilsan xuquuqda Aadamaha, waxay u yeedhan karaan Gudoomiyaha Komishanka ama xubnaha komishanka si ay wax uga waydiiyaan ama uga xog waraystaan hawlo la xidhiidha shaqada komishanka ama khilaaf komishanka dhexdiisa ah.
3. Guddiga faqrada hore ku sheegan waxay komishanka siin karaan talooyin hawshooda la xidhiidha.
4. Marka ay muuqdaan xaaladaha ku xusan faqrada 1aad ee Qodobka 21aad, ama cabashooyin la garawsan karo oo xaaladahaa ku saabasan ay soo gaadhaan guddiga Golaha Wakiilada u qaabilsan Xuquuqda Aadamaha waxay baadhis ku samaynayaan cabashooyinkaa, iyagoo ka soo diyaarinaya warbixin talooyin iyo soo jeedimo xambaarsan Golahana u soo gudbinaya.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

5. Goluhu talooyinka iyo warbixinta Guddiga markay ku haboon tahay waxay Goluhu u gudbin karaan Madaxweynaha; haddaanay ka qaadan talaabooyinka ku sheegan Qoddobka 21 aad ee xeerkan.

### Qoddobka 40aad
### KHilaafka Komishanka

1. Haddii uu soo baxo khilaafaad xubnaha komishanka dhexdooda, Guddi Golaha u qaabilsan Xuquuqda Aadamaha waxay isu keenayaan xubnaha komishanka waxayna talo ugu soo jeedinayaan in ay dhexdooda ka dhamaystaan.
2. Haddii ay suurtageli waydo in xubnaha komishanku dhexdooda khilaafka ka dhamaystaan, waxay dhegaysanayaa dhinacyada is khilaafsan, iyagoo markasta ku dedaalaya in ay khilaafka sulux dhinacyadu ku wada qancaan ka gaadhaan; waxayna ka soo saari karaan go'aamo iyo talooyin ay khilaafka ku soo af-jarayaan.
3. Haddii khilaafku soo noqnoqdo ama go'aamada iyo talooyinka guddiga la qaadan waayo, waxay Guddigu go'aamadooda iyo tallooyinkooda u gudbinyaan Golaha oo u gudbinaya Madaxweynaha haddii aanu Golaha laftiisu qaadin tallaabooyin waafaqsan xeerkan.
4. Madaxweynuhu waa in uu tixgeliyaa go'aamada iyo talooyinka Golaha ee ku xusan faqrada hore.

## CUTUBKA 6AAD
### Qoddobka 41aad
### Dhaqaalaha Komishanka

1. Komishanka Qaran ee Xuquuqda Aadamaha waxay dhaqaalaha ka helayaan.
   a. Qorshaha dhaqaale ee miisaaniyada Qaranka loogu qoondeeyey.
   b. Kaalmada Hay'addaha Caalamiga ah.
   c. Deeqaha Gaarka ah.
2. Dhamaan dhaqaalaha Komishanka Qaran ee ay helaan iyo kharashkoodaba waa in ay ka muuqato warbixin sannadeedka Komishanka.
3. Komishanka Qaran waxay yeelanayaan Bank Accounts ku salaysan qaabkooda shaqo.
4. Xisaab xidh sannadeedka Komishanka waxaa weeyaan dhamaadka sannadka (December)
5. Xubnaha komishanku waxay yeelanayaan Gunno Madaxweynuhuna ku soo saaro Digreeto.

### QODDOBKA 42AAD
### DHAQAN-GALKA

Xeerkani waxa uu dhaqan-gelaya marka ay Goleyaashu ansixiyaan **(Guurtidda iyo Wakiiladda)** Madaxweynuhu saxeexo, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah.

C/casiis Maxamed Samaale
Gudoomiye-Ku-Xigeenka 1aad ee G/Wakiilada JSL

______________________________

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xoghayaha Guud ee G/ Wakiilada JSL

______________________________

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE